Ricin


Somali

Minnesota Department of Health • Qoraalka Caddaymaha Argagixisada Sunta (Bioterrorism Factsheet) 10/10/2005

# Ricin

## Waa maxay ricin?

Raysin (Ricin) waa nooc ka mid ah noocyada sunta. Waxaa laga helaa digirta ka baxda geedka kaastorka (castor plant), oo xitta loo isticmaalo in laga sameeyo saliidda kaastorka. Waxaa laga dhigi karaa dareere, budo, ama dhagxaan.



*Digirta Kastorka*

Aad bay u adag tahay in shil ahaan uu qofku isagoon ogayn ku sumoobo raysinta. Taasi waxaa ay dhici kartaa oo keliya haddii uu qof ula kac ahaan u raysinta u isticmaalo – hub ahaan.

Raysin (Ricin) waxaa loo isticmaali karaa in dadka lagu sumeeyo iyadoo cuntada ama biyaha loogu darayo. Haddii raysinta dareeraha ama budada ah hawada lagu sii dayo, dadku waa ay ku sumoobi karaan marka ay hawada ku neefsadaan. Marka lagu qaso shey ay ku qasmi karto, maqaarka ayaa dhuuqi karaya – inkastoo laga yaabo in ay taasi tahay qaabka ugu yar ee raysinta loogu sumoobi karo. Sidoo kale waxaa loo adeegsan karaa in qof lagu sumeeyo iyadoo lagu duro.

Sunta raysinta dhimasho ayeey keeni kartaa, balse ma aha mid marwalba lagu dhinto. Calaamadk waxaa ay ku xiran yihiin cadadka raysinta, iyo sida uu qofka u qaato:

- Raysinta (Ricin) marka lagu daro ***cuntada ama biyaha*** waxaa ay keeni kartaa calaamado aad u daran "cunto ku sumoobid" – oo ay ku jiraan matag iyo shuban uu dhiig la socdo. Sidoo kale waxaa ay waxyeelaysaa beerka iyo kilyaha. Haddii uu cadadka in badan yahay, seddex cisho gudahood ayeey wax ku dili kartaa. Hal miiligaraam (milligram) oo raysin ah, raashin ama biyo lagu daro, qof weyn ayeey dili kartaa.
- Qof ***neefta ka qaata*** raysinta seddex saacadood gudaheed ayuu qufac ku billaabaa. Labalabo, shuban, iyo xanuun baa ku xigaya 18 illaa 24 saacadood gudahood. Haddii cadadka uu in badan yahay, dhimasho ayeey keenaysaa 36 illaa 72 saacadood gudahood – iyadoo dhaawac gaarsiinaysa wadnaha iyo xididada dhiigga, iyo dheecaan sambabaha gala.
- ***Durmada*** raysinta waxaa ay isla markiiba dishaa murqaha ku hareersan meesha la iska duro. Dhimasho ayaa dhaqsadiiba xigaysa, iyadoo ay ugu wacan tahay xubnaha jidhka oo idil oo istaaga.
- ***Maqaar ka qaadashada*** raysinta waa qaabka aan laga yaabin in uu qof kaga soo gaadho sunta – waana nooca aan laga yaabin in ay dhimasho keento. Waa in lagu qasaa shey ku qasmi kara marka sidani loo isticmaalayo. Calaamaadka waxaa ay ku xiran yihiin nooca sheyga lagu qaso, iyo muddada ay jidhka ku jirto.

## Sunta raysinta miyaa la daweyn karaa?

Haatan, ma jirto dawo ka hortagta raysinta balse calaamaadka raysinta waa la daweyn karayaa. Dawada waxaa ay ku xiran tahay sida ay suntan ku soo gaadhay bukaanka, balse waxaa ka mid noqon kara saacidaad xagga neefsiga, iyo weliba dawooyin iyo dareere xididka laga siiyo. Dadka ka badbaada in ka badan muddo shan cishood waxaa ay qabaan rajo fiican ay uga bogsadaan.

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH
Communications Office
625 North Robert Street/Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us

## Dadka miyaa laga badbaadin karaa suntan raysinta?

Haatan ma jidho qaab ka hortag leh ee dadka looga badbaadiyo waxyeellada raysinta. Waxaa haatan la darsayaa suuragalka in tallaal la sameyn karayo.

## Miyaad suntan raysinta ka qaadi kartaa dadka kale?

Maya. Raysinta waa nooc ka mid ah noocyada sunta. Ma uu keeno shey nool, qofna qofka kale uma gudbin karo.

## Waa maxay sababta raysinta loogu tixgeliyo hub suuragal ah in ay argagixisada adeegsato?

Muddo qarni ku dhow ayaa raysinta lagu darsayey in hub laga dhigi karayo. Mareykanka ayaa daraasad ku sameeyey xilligii Dagaalka Adduunka ee I-aad, culumada sayniska ee Ingiriiska iyo Mareykankana waxaa ay sameeyeen oo ay tijaabiyeen bam raysinta laga sameeyey Dagaalka Adduunka ee II-aad.

Koox milishiya ah ee ka timid waqooyi-galbeedka Minnesota ayaa isku dayay in ay raysinta u isticmaalaan shaqaalaha shuruucda dhaqangeliya horraankii sagaashanaadka. Ciraaq ayaa la aaminsan yahay in ay raysinta hub ka dhigtay, waxaanna jira caddaymo xiriirinayo al-Qaacida iyo isticmaalka raysin. Sannadkii 1978, raysinta lagu isku duro ayaa loo isticmaalay dilka mucaarad Bulgaariya u dhashay isagoo taagan goob basaska laga qaato ee London ku taal.

Raysin marna hub dad badan dila ahaan looma isticmaalin, mana cadda haddii ay suuragal tahay in tiro badan oo raysin ah hawada lagu sii dayo. Suuragalka ugu badan ee loo isticmaali karo raysinta ayaa ah iyadoo loo isticmaalo meel xiran, sida tareenka dhulka hoostii mara, bas ama dukaan gudihiiisa

Raysin ayaa lagu tixgeliyaa hub suuragal ah in ay argagixisa isticmaasho sababtoo ah:

- waa raqiis sameynteeduna waa ay fudud tahay
- tallaal ama dawo ma laha
- waa sun, waxaana ay sababi kartaa dhimasho dad aad u badan

## Maxaan sameeyaa haddii aan tuhmo in ay raysin i soo gaadhay?

Haddii ay jidho sabab aad ku aamini karto in laga yaabo in ay ku soo gaadhay raysin, si dhaqsiyo ah takhtarkaaga ula xiriir. Haddii aad aragtid marxalado ku shaki geliya ama hawlo ka dhex jira bulshadaada – oo ay ku jirto suuragalka hub ahaan in loo isticmaalo kiimikada raysan– ogeysii hay’adda shuruucda dhaqangelisa ee xaafaddaada.